## TILMAAMAHA ILAALINTA ISKUULLADA IYO JAAMACADAHA

## SI AANAY CIIDAMADA U ADEEGSAN XILLIYADA COLAADAHA HUBAYSAN

**Dhinacyada ku lugta leh colaadaha hubaysan ayaa waxaa loogu baaqayaa in aanay iskuullada iyo jaamacadaha u adeegsan ujeedo kasta oo dhinac milateri ah. In kastoo la qirayo in adeegsiga qaarkiis aanu ka hor imaaneyn sharciga colaadaha hubaysan, ayaa haddana dhammaan dhinacyada ku lugta leh dagaallada waxaa loogu baaqayaa in ay iska ilaaliyaan arrimaha dhibaateyn kara badqabka ardayda iyo waxbarashadooda, ayaga oo raacaya tilmaamaha soo socda ee ku aaddan hab-dhaqanka mas'uuliyaddu ku dheehan tahay.**

---

**Tilmaanta 1-aad:** Waa in dhinacyada dagaallamaya aanay u adeegsadan iskuullada iyo jaamacadaha shaqeynaya si ay ugu fushadaan ujeedooyin milateri.

(a) Xeerkan waxaa soo hoos-galaysa iskuullada iyo jaamacadaha sida kumeelgaarka ah u xiran ee aan waxbarashadu ka socon sida saacadaha aan wax la baran iyo dabayaaqada asbuuca, ama waqtiga ay ardaydu ku maqan yihiin fasaxa xilli dugsiyeedka.

(b) Ma aha in dhinacyada dagaallamaya ay awood ama qaab dhiiragelin ah u adeegsadaan maamulayaasha waxbarashada si ay u baneeyaan iskuullada iyo jaamacadaha, ayna xooggaga colaadda ku lugta leh ugu fushadaan ujeedooyinkooda milateri.

---

**Tilmaanta 2-aad:** Ma aha in dhinacyada dagaallamaya ay ujeeddo milateri u adeegsadaan iskuullada iyo jaamacadaha u xirmay khatarta uga iman karta dagaalka awgii. Haddii ay ka fursan waayaan oo aanay helin meel kale oo bedel u noqota, waa in ay kooxaha hubaysan xarumaha waxbarashada ku sugnaadaan mudada ugu kooban ee macquulka ah ilaa iyo inta ay ka helayaan meel ay ujeedadooda milateri ku fushan karaan oo u bedeli karta iskuullada iyo jaamacadaha. Waa in dhinacyada dagaallamaya ay doorbidaan dhismayaasha kale ee aan iskuullada iyo jaamacadaha ahayn, xataa haddii aanay u wanaagsaneyn sida kuwa goobaha waxbarashada, marka laga reebo dhismayaashaasi uu difaacayo Sharciga Bani'aadannimada ee Caalamiga ah (tusaale ahaan cisbitaallada), waana in dhinacyada dagaallamaya ay markasta maanka ku hayaan in hantida dadka rayidka ah aanay waxyeelo ka soo gaarin dagaalka.

(a) Waa in adeegsiga iskuullada iyo jaamacadaha laga qaxay ama la baneeyay uu socdaa waqtiga ugu yar ee macquulka ah.
(b) Waa in maamulayaasha waxbarashada loo ogolaadaa in iskuullada iyo jaamacadaha laga qaxay ama la baneeyay, isla markaana ay ujeedada milateri u adeegsanayaan dhinacyada dagaallamaya, ay dib u furi karaan xilliga ugu horeeya ee ugu macquulsan marka ay ka baxaan xooggaga dagaallamaya, waa haddii taasi aanay khatar gelineynin ammaanka ardayda iyo shaqaalaha.
(c) Marka ay xooggaga dagaallamaya ka baxayaan goobaha waxbarashada, waa in ay meesha ka saaraan wax kasta oo muujinaya astaan ciidan ama dufeys ah, waana in dayactir lagu sameeyaa burbur kasta oo loo geystay dhismayaasha xarumaha waxbarashada. Waa in si gaar ah goobaha waxbarashada looga saaraa hubka, rasaasta, walxaha qarxa ee aan wali qarxin, iyo wax kasta oo muujinaya dagaal.

---

**Tilmaanta 3-aad:** Waa in aan iskuullada iyo jaamacadaha la burburin ayadoo looga gol leeyahay in dhinaca kale ee dagaalka ku lugta leh aanay mustaqbalka adeegsan. Iskuullada iyo jaamacadaha, ha ahaadeen kuwo waxbarasho ka socoto, ama kuwo xiran fasax awgii, ama kuwo laga qaxayba, waa hanti ay bulshada rayidka ah leedahay.

---

**Tilmaanta 4-aad:** In kastoo iskuullada ama jaamacadaha ay adeegsadaan xooggaga hubaysan, ayada oo loo eegayo xaaladda ay u adeegsadaan, ay ka dhigi karto goobo ciidan oo weerar lala beegsan karo, ayaa haddana dhinacyada colaadda ku lugta leh waxaa loogu baaqayaa in ay ka baaraandegaan tallaabooyin kale ka hor inta aanay weerarrin goobahaasi, sida in haddii ay xaaladdu saamaxayso ay usii digaan cadowgooda, ayaga oo u sheegaya in ay weerarri doonaan haddii aanay ka bixin goobahaasi waxbarashada.

(a) Ka hor inta aan weerar lagu qaadin iskuul loo adeegsanayo ujeedo milateri, waa in dhinacyada ku lugta leh colaadda ay maanka ku hayaan in carruurta ay leeyihiin xurmo gaar ah iyo ilaalin. Waa in sidoo kale ay tixgelin dheeraad ah siiyaan dhibaatada mudada dheer ah ee burburinta ama waxyeelleynta iskuulka ay ku reebi karto helitaanka waxbarashada ee bulshada.
(b) Haddii dhinac ka mid ah kuwa dagaallamaya uu iskuul ama jaamacad u adeegsado ujeedo milateri, taasi cudurdaar uma noqoneyso in dhinaca kale uu dagaal uga qabsado goobahaasi, isla markaana uu usii adeegsado ujeedooyinkiisa milateri. Waa in sida ugu dhaqsaha badan ay meesha uga saaraan wax kasta oo muujinaya astaan ciidan ama dufeys ah, waana in goobahaasi dib loogu celiyaa gacanta maamulka rayidka ah si halkaasi ay uga sii socoto howsha waxbarashada.

---

**Tilmaanta 5-aad:** Waa in aan qeyb ka mid ah dhinacyada dagaallamaya ilaalo looga dhigin iskuullada ama jaamacadaha si ay u sugaan ammaankooda, waa haddii la heli karo

cid ka baxsan colaadda oo sugi karta ammaanka asaasiga ah. Haddii ay suuragal tahay, dad rayid ah oo si wanaagsan loo tababaray ayaa loo adeegsan karaa in ay sugaan ammaanka iskuullada iyo jaamacadaha. Haddii ay lagama maarmaan noqotana, waxaa laga baaraandegi karaa sidii meel ammaan ah loogu rari lahaa ardayda iyo shaqaalaha goobaha waxbarashada.

(a) Haddii ay dhacdo in xooggag qeyb ka ah dagaalka loo adeegsado howlo ammaan sugid ah oo la xiriira iskuullada iyo jaamacadaha, waa in aanay ka dhex muuqan dhismayaasha goobaha waxbarashada, si aanan dhibaato usoo gaarin maqaamka rayidnimada ah isla markaana aanu u hakan jawiga waxbarashada.

---

**Tilmaanta 6-aad:** Waa in dhammaan dhinacyada ku lugta leh colaadda hubaysan ay sida ugu macquulsan oo ugu haboon ay xeerarkan ama tilmaamahaan ugu daraan, tusaale ahaan, caqiidadooda, buugaagtooda milateri, shuruucda dagaalka, amarrada howlgallada iyo qaababka kale ee ay macluumaadka ku faafiyaan, si ay ugu dhiirigeliyaan guud ahaan taliskooda in sida ugu habboon ay u fuliyaan xeerarkan. Dhinacyada ku lugta leh colaadda hubaysan waa in ay go’aan ka gaaraan qaabka ugu wanaagsan ee ay sidan ku samayn karaan.